



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad

Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:2-aad

Tr:18.04.2016

Kalfadhiga 8-aad

Kulankiisa:2-aad, sacada furitaanka.12:40 gh, sacada xiritanka.1:20 gd.

Guntinta: 144 xildhibaan.

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.U Codeynta Mooshinka hakinta Maamul u Sameeynta Labada Gobol

“Hiiraan iyo Shabeelaha Dhexe”

4.Doodda Hindise Sharciyeedka lagu Dhisaya Axaabta Siyaasadda

5.Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka ka hortagga Walxaha Qarxa

6.Akhrinta 2aad Hindise Sharciyeedka La dagaallanka Argigixisada ”ku wargelin la tashi

Maamulada Gobolada”.

Shir-Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya.

Mudane:Jeylani Nuur likar.

1.Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya

Mudane:Jeylani Nuur likar, waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xil:sheikh shaacir.

2.Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar wuxuu xildhibaanada u soo jeediyay in ay ansixiyay ajendaha,

Intaa ka dib wax Ajende ah lama guda galin manta.

Xildhibaan:Daahir Aamiin jeesow, Toosin,waxaan u soo istaagay in laga saaro ajendaha maamul u sameynta Gobolada Shabeelaha Dhexe iyo Hiiran qodob Dastuuri ayaa jabaaya.

Xildhibaan:Kulalihi,wuxuu soo jeediyay,waxaan u nimid in aan qabano howlihii naloo idmaday, qodobkas waa mid jira,wuxuu xaq u leeyahay inuu yiraahdo hala tiriyo inta joogto,ee lama hor istagi karo ajendaha, Baarlamaanka iyo shacabka anagaa masu'l u ah aan ansixino ajendaha, waxaa loo codeynayaa in uu kooramka dhan yahay, 550 qof meydhooda banaanka ayuu daadsan yahay,waxaa nalooga baahan yahay baroor diiq, Soomaaliya uma baahno bur bur ee waxay u baahan tahay wada hadal, waxan kaloo codsaneynaa in aan manta joojino Baarlamaanka baroor diiqna aan sameyno.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yuusuf,wuxuu soo jeediyay, Soomaaliyay Tacsii ayaa noo tala,waa in aan sameyna Tacsii Qaran, waxan qabaa in aan muujino in aan ka xunahay Tacsida no tala, aan sameyno baroordiiq.

Xildhibaan:Goodir,wuxuu sheegay,mooshinkan waxaa ku jira qodob dhahaya Gobolada waxaa dhisaya Baarlamaanka cusub ee soo socda markuu yimado sharci mahan mana soconeyso, dadka ka soo jeeda hiiran in ay usu yimaadan.

Xildhibaan:C/qaadir Sandheere,wuxuu soo jeediyay, Guddoomiye ajendaha loo codeyay war kama taagno, hadii aan loo codeynina hada ha loo codeyo, waxan seken gareynayaa xildhi.Maxamed Cabdi Yusuf, waa in loo baroordiiqa dadkii Soomaaliyeed ee geeriyoday.

Guddoomiye ku xigeenka 1aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar,wuxuu soo jeediyay,ajendaha yaala awood baad uleedihiin in aad ogolaatan ama aad diidan, hala soo tiriyo inta Xildhibaan Golaha fadhiya.

Intaa ka dib Codkii lama qaadin wey suurta gali weysay.

Kalfadhiga 8-aad Kulankiisa:2-aad, uu shir Guddoominayay,Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur likar, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:20 gd.